

FAAFINTA

الرسمية



RASMIGA

الجريدة

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

لولاية ارض بونت الصومال

Sanadka 9-aad. Garowe 25. February . 2007

Lam. 2

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

Qeybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10.000 walba rukunka sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudihisa dibada Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wassaaradda maaliyadda.

TUSMADA

Qeybta Koowaad

Sharci

Qeybta labaad

Xeer

Waxba Ma leh

Qeybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

Sharci Lr. 9. ee 20/07/2007, kuna saabsan Qaanuunka Dimoqraadiyeynta Nidaamka Siyaasadeed ee Puntland.

**DAWLAD GOBOLEEDKA
PUNTLAND EE SOMALIYA**
Xafiiska Madaxweyne ku xigeenka
Ahna sii hayaha xilka Madaxweynaha



**PUNTLAND STATE
OF SOMALIA**
Office of the Vice-president
being an acting president

**Sharci Lr.9. ee 20/07/2007, kuna saabsan Qaanuunka Dimoqraadiyeynta
Nidaamka Siyaasadeed ee Puntland.**

Madaxweynuhu

- Markuu arkay** : **Dastuurka DGPL Qodobkiisa 55-aad
faqradiisa 1-aad.**
- Markuu arkay** : **Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee
Sumad XGGW/DGPL/18/2006 ee
28/01/2007.**
- Tixgaliyeyna** : **Muhiimada Qaanuunkani u leeyahay Puntland.**
- Asagoo Dhagaystay** : **Rayiga Golaha Xukuumada**

Wuxuu soo saaray

Shareigan soo socda:-

Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Qaanuunka Horumarinta Dimoqraadiyeynta nidaamka siyaasadeed ee Puntland.

Qodobka 2-aad


Nuqulada asalka ah waa la kaydinayaa.

Qodobka 3-aad

Dhaqan galka Qaanuunkani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu faafinta rasmiga ah ee dawlada ku soo baxay, kaasoo kamid noqonaya shuruucda dawlada, cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhowro kuna dhaqmo.

Wabilaahi Towfiiq

Mud. Xasan Daahir Maxamuud
Madaxweyne ku xigeenka
ahna Sii haya Xilka Madaxwenaha

DOWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA		PUNTLAND STATE
XAFIISKA		OF SOMALIA
MADAXWEYNAHA		OFFICE OF THE PRESIDENT

Xeer Madaxweyne Lr. 08 ee January 10, 2007 kuna saabsan horumarinta dimoqraadiyeynta nidaamka siyaasadeed ee Puntland

Madaxweynaha dowladda Puntland,

Markuu arkay : Dastuurka Puntland,

Markuu arkay : Sida loogu baahan yahay in la xaqiijiyo himilada shacbiga Puntland,

Markuu tixgeliyey : Xaaladda siyaasadeed ee Soomaaliya,

WUXUU XEERIYEEY:

- 1- In la dhammaystiro dib-u-eegidda Dastuurka Puntland,
- 2- In la darso suuragalka in afti guud loo qaado Dastuurka Puntland,
- 3- In la magacaabo Guddiga Doorashada oo maamuli/diyaarin doona barnaamijka dimoqraadiyeynta nidaamka siyaasadeed,
- 4- In la diyaariyo xeerka waajibaadka Guddiga Doorashada,
- 5- In la diyaariyo xeerka Axsaabta,
- 6- In la diyaariyo xeerka doorashada guud ee Golaha Wakiilada,
- 7- In la diyaariyo qaab-maamuleedka hawlaha doorashada,
- 8- In la diyaariyo diiwaangelinta cod-bixiyaha,

Maxamuud Muuse Xirsi
Madaxweynaha Dowladda Puntland

